**Hadal loo jeediyay Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay**
**14ka Janaayo 2010**
**Ahmedou Ould-Abdallah, Ergeyga Gaarka ah ee Qarammadda Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha Siyaasadda Soomaaliya**

Mudane Madaxweyne,

Marka hore, waxaan si niyadsami ku jirto tacsi ugu dirayaa dadkii ku waxyeelloobay dhulgariirkii ba'naa ee ka dhacay Haiti.

Waxaa dhowaan si aad ah heer caalami iyo heer goboleedba loo ifiyay arrimaha Soomaaliya. Dhibaatada Soomaaliya ka jirta ma aha mid indhaha laga qabsan karo maadaama ay hadda noqotay mid aad u qallafsan. *Dhab ahaantii, dhibaatadu way ka gudubtay heer waddan iyo heer gobolba.* Arrintu waa heer caalami. Tan iyo warbixintaydii ugu dambeysay ee aan siiyay Golaha Amaanka, dowladda Soomaaliyeed waxay gaartay horumar la taaban karo, inkastoo kooxo xagjir ah oo hubaysan ee dibadda laga maalgeliyo ay dhowr jeer isku dayeen inay afgembiyaan.

Waxqabadka ay dowladdu gaartay waxaa ka mid ah: waxay sugtay joogitaankeeda ee caasimadda Soomaaliya; waxay dejisay miisaaniyad taasoo aan muddo toban sanno ah aan la sameyn; waxay soo gudbisay qorshaheeda oo loo kala horeysiiyay sida ay mudnaanta u kala leeyihiin; waxay qortay oo ay tababartay ciidamo nabadgelyo; waxaa kaloo ay hanatay awoodda sharci ee siyaasadeed ay kula dhaqmeyso kooxo xagjir ah oo qalalaaso wado. Inkastoo ay sidaas tahay, haddana albaabada dowladdu way u furan yihiin dhommaan dadka Soomaaliyeed ee diyaarka u ah wadahadal iyo dibuheshiisiin. Qaramada Midoobay waxay si buuxda u taageersantahay habkan nabadda ku dhisan ee waxtarkiisa laga dareemay waddanka ayna wadaan dad Soomaaliyeed oo wadaniyiin ah.

Sannado badan oo ay colaadi jirtay ka dib, xaaladda Soomaaliya habeen keliya isku beddeli karto. Hase ahaatee, waxaanu hadda ka gudbaynaa marxaladdii *dowlad fashilantay* oo waxaanu u guuraynaa marxaladda *dowlad taag daran*.

Si xaaladda Soomaaliya sida ay hadda tahay uga sii darin uguna gudbin gobolka iyo meelo ka sii baxsan, waa inaan dadaalkeena isu geynaa. Bulshada caalamku waxay weli ku leedahay saameyn muhim ah. Haddaba, waa inay si sax ah kaalinteeda u cayaartaa si looga hortago laba caqabado oo waaweyn.
Tan koowaad, weli bulshada caalamku lama aysan imanin go'aan dhab ah ee la taaban karo iyo siyaasad caalami ah ee ku wajahan Soomaaliya iyo hoggaanka hadda ka jiraba.

Sidaas oo kale, shakiga joogtada ah iyo maqnaanshaha tallaabooyin la taaban karo ayaa dhiirigeliyay kooxaha xagjirka ah, islamarkaasna daciifiyay Dowladda Soomaaliyeed. Dowladdu waxaa si joogta ah weerar ugu haya kooxo xagjir ah oo taageero xoog leh dibadda ka haysta. Kooxahani waxay si cad u muujiyeen inay leeyihiin qorshe caalami ah, Soomaaliyana ay u noqotay meel jilicsan oo ku haboon inay ka bilaabaan hawshooda.

Waxaan na looga baahanyahay inaan fahamno in kooxaha xagjirka ah ee ka mas'uulka ah qaska ay ku dhex jiraan shisheeye fara badan oo ujeeddadoodu aysan ku koobnayn inay xoog ku afgembiyaan xukuumadda oo kaliya, laakiinse ay ka soo horjeedaan in la dhiso wax xukuumad ah. Ujeeddadooda ugu dambeysa waxaa ka mid ah in xaaladda hadda jirta ee qaska ah sideeda ugu hayaan ama ay dhisaan xukuumad xagjir ah. Damaca iyo hammiga kooxdani wuxuu aad uga weynyahay Muqadishu  iyo Soomaaliyaba. Hase ahaatee, labadan ujeeddo ee aan soo sheegnay – qas ama dhismo dowlad xagjir ah – midna ma metelo rabitaanka daddka Soomaaliyeed ee rabitaankooda aasaasiga uu yahay, sida ummadaha kale ee adduunkuba ay qabaan, in ay helaan nabad iyo dowlad badbaadisa naftooda, adeegna u fidisa.

Intaa waxaa dheer, ujeeddooyinka kooxaha xagjirka ah waxay khatar ku yihiin waddamada gobalka, urur goboleedka IGAD iyo waddamada kale ee ka fogba. Dhab ahaantii, xaaladda oo si dhab ah loo qiimeeyo waxay na tuseysaa waxaan horeyba u ogeyn:- in Soomaaliya aysan khatar isku ahayn iyada nafteeda oo kaliya, balse ay khatar ku tahya adduunka oo dhan, arrinta burcad badeednimaduna  ay uun ka mid tahay falalkii ugu dambeeyay ee khasaaraha badan geysta. Arritan waxaa ka sii murugo badan in kooxaha xagjirka ahi ay si aad ah ugu qanacsanyihiin in dhibaatada Soomaaliya aysan aad muhim ugu ahayn bulshada caalamka. Aragtidan ay qabaan ee ah in aan Soomaaliya la daneynaynin ayaa si xoog leh ugu dhiirigelisay kooxaha xagjirka ah inay dagaalka sii wadaan. Sidaas darteed, kooxaha xagjirka ah waxay ka gudbeen khadkii ayagoo handadaya waddamo badan ee Afrika iyo kuwo kaleba, taasoo muujisay sida ay waddamadaasi dhibka ugu nugulyihiin.

Caqabadda labaad waxay tahay, inkastoo bulshada caalamku ay si guud ahaan u muujisay taagerada xukuumadda Soomaaliyeed, haddana taageeradaas weli looma beddelin mid maaliyadeed. Tusaale ahaan, shirkii deeqbixiyeyaasha ee Brussels loogana hadlayay arrinta Soomaaliya bishii Abriil 2009, oo uu shir-guddoominayey Xoghayaha Guud ee Qarrammada Midoobay, waxaa shirkaas lagu ballanqaaday lacag gaaraysa 213 milyan oo doolarka Maraykanka ah. Hase ahaatee, ila iyo hadda wax yar uun baa laga bixiyay si loo gaaro dantii la lahaa. Dhab ahaantii, ila iyi intii la sameeyay xukuumadda waxay ku hawlgaleysay dhaqaale yar ee dibada laga siiyo. Waddamo tiro yar oo ay ka go'antahay ayaa si toos ah wax u siiyay xukuumada iyaga oo u soo marinaya shirkad caalami ah ee xisaabaadka qaabilsan. Dowlad kalena waxay billowday arrin cusub oo si toos ah lacag loo soo mariyo Bangiga Dhex ee Soomaaliya.

10kii ilaa 15kii sanno ee la soo dhaafey, bulshada caalamku waxay siyaabo kala gedisan ugu bixisay Soomaaliya lacag gaaraysa 8 biyan oo doolar Maraykan ah. Inkastoo lacagtani tahay lacag badan, haddana waxay wax ka qabatay astaamaha qaska keliya, waxaana laga yaabaa inayba sii kicisay xaaladda guud ee dalka. Iyada oo xaalku sidaa yahay, ayey haddana xukuumadda Soomaaliyeed la'dahay kaalmadii dhaaqale ay wax uga qaban lahayd adeegyada assaasiga ah si ay u shaqeyso. Arrimahana waxaa ka mid ah inay si joogo ah u bixiso mushaaraadka la siinayo xubnaha baarlamaanka iyo ciidamada nabadgelyada. Dhinaca kale, dadka xukuumada ka soo horjeeda iyo huwantooda xagjirta ahba waxay helaan kaalmo dhaqaale oo aan xad lahan ee aan cidna eegin.

Mudane Madaxweyne

Dhibaatada Soomaaliya ka taagan waxay jirsatay muddo ku dhow 20 sanno. Marnaba xaaladuhu ma noqdaan kuwo ku habboon in si xoog ah loo soo farageliyo. *Sidaas darteed, ma kari karno in aan xaalada sida ay hadda tahay aan ku hayno anaga oo sugeyna in ay xaaladdu hagaagto.* Waa in aan arrinta meel uun aan ka billowno. Heshiiskii Jabuuti ayaa siinaya bulshada caalamku meel si dhab ah wax uga billowdo, wixii dhaqaale ah ee ay bixinaayaana waa inay siiyaan xukuumadda Soomaaliyeed.

Haddii aan wax ku kordhiyo dooddiina, waxaan soo jeedin lahaa talooinkan soo socda oo assaas u ah hurumarinta xaaladda Soomaaliya.

Tan koowaad waa in bulshada caalamku ay joojisaa dhaqankeedii hore ee ahaa wada xiriir la'aanta kuna dhisnaa tallaabooyin diblomaasi oo gooni gooni ah, oo ka mid tahay qabashada kulamada iyo shirarka dib u heshiisiineed ee midba mid kale ka danbeeyo. Waa la taageero ujeeddo guud ee siyaasadeed oo loo dhan yahy. Sidaas darteed, waa in Heshiiskii Jabuuti uu ahaado waddada kaliya ee lagu kulmiyo dadaallada ay dadka Soomaaliyeed iyo kuwa bulshada caalamku horumar ku gaaran.

Talo soo jeedinta labaad waxay tahay in dowlada la siiyo taageero buuxda. Golaha Amaanku waa inuu farriin adag oo cad u diro kooxaha xagjirka ah asagoo si dhab ah u xoojinaya Dowladda. Dawladdu waxay u baahantahay in la kaalmeeyo si ay si tartiib tartiib ah ugu adeegto dadka, una noqoto saaxiib karti leh oo ay isku hallayn karto bulshada caalamku. Gaar ahaan, bulshada caalamku waa in ay si weyn u bixisa taageero isugu jirta dhinacyada niyadda, dibalomaasiyada iyo dhaqaalahaba. *Kaalmo lagaa daahiyey waa kaalmo laguu diiday.* Ayadoo la arkayo khatar isa soo tareysa, xal ma aha in bawdka la iska fadhiyo.

Tan seddaxaad, waxaa lagama maarmaan noqotay in si dhow loola shaqeeyo urur gobaladeedka IGAD, Midowga Afrika oo ay wehliyaan Ururka Jaamacadda Carabta iyo Ururka Caalamka Islaamka. Hawsha nabadilaalinta ee Ururka Midawga Afrika AMISOM, wuxu mudan yahay, oo si degdeg ah loogu baahan yahay, in lagu taageero arrimaha soo socda: in gunnada ciidamada la kordhiyo lana gaarsiiyo heerka gunnada caalamiga ah, in la siiyo mushaaraadkooda waqti walba iyo hubka ay u baahan yihiinba. Arrintani ma aha a mid xaq ah oo kor loogu qaadaayo niyada ciidamada oo kaliya, laakiin waxay farriin sah ee ka timid bulshada caalamka u direysa waddamada leh awoodda ciidan yaboohida.

Tan afaraad, Goluhu waa inuu si xoog leh wax uga qabtaa falalka qaswadayaasha, waa in uu cadaadis ku saara qaswadayaasha, ha ahadeen kuwa jooga dalka gudihiisa ama dibadiisaba in ay joojiyaan falka qaska ku dhisan. Farriin cad oo wax qabad leh oo ay wehliyaan fal la taaban karo ayaa u muujinaya kuwa maalgeliya xagjirayaasha dadka rayidka ah ee aan waxba galabsan u abuuraya masiibooyin naxdin leh, kuna xadgudbaya shuruucada caalamiga ah oo ay ka mid tahay in carrurta yaryar si caadi ah oo baahsan loo ciidameeyo, loona handado nabadda iyo xasilloonida gobalka oo dhan – falalkaas waa in aysan noqonin kuwa aan la xisaabtan ka dambeynin. Badbaadinta dadka rayadka ah waa waajib Soomaaliya dhexdeeda in badan la iska illaabay.

Ugu daMbeyntii, talooyinkani waxaa si dhab ah loo hirgelin kara marka ay bahda Qaramada Midoobay ee ka hawlgalaya Soomaaliya, sida ka jirta xafiisyada siyaasadda ee Qaramada Midoobay ama xafiisyada nabadilaalintuba, inay isla hawlgalaan si isku dhafan oo is waafaqsan. Qaraarka Golaha Amaanka ee tirisigiiso yahay 1863 (January 2009) ayaa arrintaan ka cadeynaya. Waxaan aaminsanahay in madaxda Xoghaynta Qaramada Midoobay ay xaqiijin doonto in arrimahan aan soo sheegay laga dhabeeyo toddobaadyada soo socda gudahooda. Isla markaasna la dedejiyo guuritaanka ay Qaramada Midoobay u guurayso Muqdisho. Si loo kaalmeeyo dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa ay waxyeelladu gaartay, waan inaan garab istaagnaa oo aan la joognaa.

Mudane Madaxweyne,

Waxaan garowsanahay in Golaha Amaanku uu doonayo inuu ka hadlo arrimo badan, oo Soomaaliyana ay ka mid tahay arrimahaas. Hase ahaatee, haddii laga gaabsado in si dhab ah loo farageliyo nabadna lagu soo dabaalo Soomaaliya oo ah goob haddaba khatar ku ah nabadda guud ee caalamiga taasoo kallifaysa hanti aad u fara badan. Haddii hadda tallaaba kama dambeys ah la qaadi waayo waxaa sii si xad dhaaf ah u kordhi doona khasaarahaas.

Mahadsanidiin